

SAMEE GO'AANKA SAXDA AH EE KU HABBOON NAFTAADA IYO QOYSKAAGA



Dadka dawlada biisho ma quseeyso dhamaan dadka soogalootiga ah. Qoys kasta waa ka duwan yahay kuwa kale, dhammaan barnaamijyada caawiya qoyskaaga maaha qasab inay qayb ka ahaadaan isbadalada cusub ee lagu samaynaayo xeerka. **Waxaa jiro dad aad u badan iyo ururo oo ku caawin kara.** Qareen dhanka soo galootiga ah oo hawshaan khibrad u leh ayaa talo kaasiin kara xaalada asagoo ka fiirinaaya xaaladaada gaarka ah. Haayadaha khayriga ah ee maxaliga ah ayaa sidoo kale awooda inay caawimaad iyo talo sharci ku siiyaan.

WAA MAXAY DADKA DAWLADU BIISHO?

Qaar kamid ah dadka codsada green card (Kaarka Cagaaran) (daganaanshaha sharciga ah ee rasmiga ah) ama fiisada si ay usoo galaan Maraykanka waa inay ku baasaan imtaxaanka hubinta inuu yahay “qof dawlada biisho” – imtaxaankaas oo eegaaya in laga yaabo in qofku adeegsado qaar kamid ah adeegyada dalwada qaarkood mustaqbalka. Marka la gaaraayo go’aankaan, saraakiisha soo galootiga ayaa dib u eegis ku samaynaaya dhammaan xaaladaha qofka, ayna ku jiraan da’diisa, dakhliga soo gala, caafimaadkiisa, waxbarashadiisa iyo xirfadihiisa (ayna ku jiraan xirfadaha ku hadalka luuqada Ingiriiska), iyo cadaynta qofka isboonsarka usoo diraaaya ee taageerada iyo heshiiska. Waxay sidoo kale ka baaraan dagi karaan in qofku adeegsaday iyo in kale barnaamijyada dawlada qaarkood.

Baaritaanka Department of Homeland Security (DHS, Waaxda Ammaanka Qaranka) ee dadka dawlada biisho waxaa lagu eegaa:

- Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, Barnaamijka Caawimaada Kaalmada Cuntada, “EBT” ama “Kaalmada Cuntada”)
- Caawimada Federal Public Housing (Guriyeynta Dawlada Federaalka ah) iyo qaybta 8
- Medicaid (marka laga reebo adeegyada xaalada degdega ah, carruurta ka yar 21 sano, haweenka uurka leh, iyo hooyoyinka cusub)
- Barnaamijyada caawimaada kaashka ah (sida SSI, TANF, Caawimaada Guud)

Inta badan dadka uu qabanaayo sharciga cusub uma qalmaan gunooyinka kor lagu qoray. Adeegyada aan ku jirin liiska kore laguma xisaabinaayo imtaxaanka qofka dalwadu biisho ee lagu daraayo. Adeegyadaan waxaa ku jira WIC, CHIP, qadooyinka dugsiga, kaydada cuntada, hooy-yada, barnaamijyada daryeelka caafimaadka ee gobalka ama deegaanka, iyo adeegyo kale oo badan.

Waxaan turjumay **Seattle Office of Immigrant and Refugee Affairs**, waxaa lagasoo min guuriyay Protect Immigrant Families Coalition (Isbahaysiga Difaaca Qoysaska Soo galootiga ah).



WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH BOOQO: [PROTECTINGIMMIGRANTFAMILIES.ORG](https://www.protectingimmigrantfamilies.org).

QARASHKA DAWLADU BIXISO: ARINTAAS ANIGGA MA I QUSEYSAA?


WAXAA LA CUSBOONAYSIIYAY 2/2020.



Adigga iyo xubnaha qoyskaagu ma tihiin muwaadiniin Maraykan ah?
Qarashka Dawladu bixiso adigga KUMA quseeyo. Waa inaad sii wadaa iska qorista barnaamijyada aad u qalanto.




Adigga iyo xubnaha qoyskaagu horay ma u haysateen kaararka cagaaran?
Qarashka dawladu bixiso iyo qarashaad kasta oo kujira xeerka cusub wax saamayn ah KUGUMA yeelan doono markaad cusboonaysiinayso kaarkaaga cagaaran) ama aad codsanayso muwaadinimada Maraykanka. Hase yeeshee, haddii aad qorshayno inaad wadanka ka maqnaato wax kabadan 6 bilood, waa fikir fiican inaad la hadasho qareen dhanka socdaalka ah.



Somali



Miyaad codsanaysaa ama leedahay mid kamid ah aqoonsiyada soo socda?
TPS, U ama fiisada T, aqoonsiga Magangalyo doonka ama Qaxootiga, ama aqoonsiga Gaarka ah ee Carruurta soo Galootiga ah? Baaritaanka qarashka dawladu bixiso MA qabanaayo dhammaan dadka soo galootiga ah, ayna kujiraan qaybaha halkaan ku qoran. Haddii aad horay u haysatay ama aad kujirto codsiga mid kamid ah aqoonsiyadaan soo galootiga, waxaad sii wadan kartaa adeegsiga barnaamijyo kasta oo dawladu bixiso aadna xaq uleedahay.



Ma qorsheyneysaa inaad codsato kaarka cagaaran ee qoyska ku saleysan (family-based green card)?

Kaliya waxay isticmaalaan barnaamijyada dawlada ee ku qoran boga koobaad ayaa lagu baarayaa imtaxaanka qofka dawladu biisho. Dakhligaaga, da'daada, caafimaadkaaga, waxbarashadaada, xirfadahaaga, xaalada qoyskaaga, iyo cadaynta qofka isboonsarka kuu sameeyay ee taageerada ayaa sidoo kale la baarayaa. Waa inaad kala hadashaa khabiir si uu talo kaaga siiyo kiiskaaga kahor intaadan wax go'aan ah gaarin. Si aad u hesho dookhyada lacag la'aanta ah ama qiimaha jaban ee laga heli karo deegaankaaga, booqo barta:

immigrationadvocates.org/nonprofit/legaldirectory.



Waxaan turjumay **Seattle Office of Immigrant and Refugee Affairs**, waxaa lagasoo min guuriyay Protect Immigrant Families Coalition (Isbahaysiga Difaaca Qoysaska Soo galootiga ah).

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH BOOQO: PROTECTINGIMMIGRANTFAMILIES.ORG.